Xajirnimada Diineed iyo Khatarta ay Ummada u Leedahay

Dr. Maxamuud C/Raxmaan – Al-Madiinah Al-Munawarah

1. Hordhac Kooban

Mahad dhammaanteed waxay u sugnaatey Rabbi hufnaaye, naxariis iyo nabad gelyna suubaha Nabigeena korkiisa ha ahaato.

Waxaan qormadaan kooban ku qaadaa dhigi doonaa haddii Rabbi idmo mowduuc aad u muhiim ah saldhigna u ah dhibaatada guuntay ee ragaadisay ummadda Soomaaliyeed laga soo bilaabo markii ay ka xoreebeen isticmaarkii na gumeeyey wixii ka horeeyey lixdameeyaddii.

Waxaan ka hadli doonaa xagjirnimadda nooceeda diimeed iyo khatarta ay ku hayso ummada. Waxaan ifindoonaa Rabbi idankiis astaamaha ay xagjirnimaddu leedahay iyo waxa lagu garto qofka xagjirka ah. Waxaan si gaar ah isu bar-bar dhigi doonaa meelaha ay iskaga dhafmaan “xagjirnada diimeed” iyo “xagjirnada siyaasadeed”.

Xagjirnimaddu waxay weligeed ahayd cudur soo jireen ah oo sabab u noqda in Ummado rogmaan. Waxaan shaki ku jirin in Ummadda Soomaaliyeed la soo daristay xagjirnamadu ayna saldhig u tahay dhiiga xurmadda leh ee sida aan kala go’a hayn u daadanaya. Xagjirnadu waxay gaartey baarkeedi ugu sareeyay mar haddii maanta la ugaarsanayo Culimadii iyo biri ma geydadii isla markaasna loo arko in daadashada dhiiga xurmada leh lagu gaarayo raali ahaanshada Rabbi iyo shahiidnimo! Waxaa maanta gabad iyo gumaad ku jira nin door oo dhan hadday yihiin culimo diineed, aqoon yahan wax ku ool ah, oday dhaqameed iyo weli qofkasta oo waxtar u yeelan kara mustaqbalka ummadda.

Xagjirnadu waxay soo ifbaxday markii Nebi Muxammad (naxariis iyo nabad gelyo korkiisa ha ahaatee) lagu tuhmay in uusan caddaalad samayn! Waa yaabe haddii uusan Nebigii Rabbi soo dirsaday ee risaalada lagu aaminay uusan cadaalad sameyn yaa laga sugayaa in uu cadaalad sameeyo. Xagjirnadu waxay soo bilaabantay markii Cali Ibnu Abii Daalib – *oo ka mid ahaa khulafadii hanuunsanayd ahaana qof dhalin yaro ah ee Islaam qaata qofkii ugu horeeyay isaga oo noolna Janno iyo Rabbi raali ahaanshihiis loogu bishaareeyey* - loo dilay in lagu Janno tago oo dhiigiiisa Rabbi loogu dhowaado (maxaa maanta shaley uga eg!). Xagjirnamadu waxa si bareer ah u soo ifbaxday marka dhiiga Culimada iyo dadka diinta fidinteeda ku cireystay si aan gabasho la hayn loo iftooday in la gumaado isla markaasna lagu andacoodo in lagu Janno tegayo.

Xagjirnadda iyo khatarta ay leedahay Qur’aanka iyo Axaadiista Nebbiguba aad ayay uga hadleen, waxaana laga qoray kutub aad u fara badan si ummada looga badbaadiyo cudurkaan wax-ma reebaha ah.

Nusuus badan ayaa kusoo arooray xagjirnimada, waxaanse hordhacaan kooban kusoo qaadanaynaa qeyb ka mid ah.

Rabbi isaga oo la hadlaya reer banii Israa'iil ayuu ku yiri: "***Kuwa kitaabka la siiyeyow, ha ku dhicinnina xagjirnimo diimeed***" (Nisaa, 171).

Xaddiis saxiix ah wuxuu Nebigeenu ku yiri (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha haatee): "***War iska jira xagjirnimadda diimeed, maxaa yeelay ummadihii hore waxay ku haligmeen xagjirnimo diimeey***" (Saxiix Jaamic Sagiir, xadiis # 2680).

Ibnu Mascuud (Rabbi ha ka raali noqdee) wuxuu Nebiga (Naxariis iyo Nabadgelyo korkiisa ha ahaato) ka weriyey in uu yiri: "***Waa halaagsameen xagjirku, waa halaagsameen xagjirku, waa halaagsameen xagjirku***" (Saxiix Muslim) – Saddex jeer ayuu Nebbigu (Naxariis iyo Nabadgelyo korkiisa ha ahaatee) ku cel-celiyey khatarta ay leedahay xagjirnimadu darteed.

2. Waa maxay Xagjirnimadu?

Xagjirnimo: waxaa lagu qeexaa in shay laga qabsado daaftiisa u shisheysa, ama looga baxo darafta ugu fog. Xagjirnaddu waxay la macno tahay ***xad-gudub*** oo ah in qofku uu talaabo soohdinata la ogolyahay. Waxaa lid u ah ***dhex-dhexaadnimada*** (sida ka muuqata shaxda ka muuqata dhanka midigta ah) oo ah in qofku ku ekaado xudduuda ama soohdinta sharciga ah oo uusan ka gaabin ama uusan talaabin sida Nebigu (Naxariis iyo Nabadgelyo korkiisa ha ahaatee) u yiri: "***Rabbi wuxuu idinka rabaa waajibaad ee ha dayicinnina, wuxuuna idiin xadeeyey xuduud ee ha gudbinina***" (Bukhaari iyo Muslim)



Xagjirnamadu waxay leedahay labo daraf. Daraf waa in qofku ka gaabiyo ama *ku gabood falo* in uu la yimaado waajibaadkii la iska rabay waxaana loo yaqaan "***Tasaahul"***. Darafka kale waa in uu qofku la yimaado wax ka baxsan xadkii loo baahnaa waxaana loo yaqaan "***Tashadud"***. Noocaan dambe waa kan caanka ku ah xagjirnada, isla markaasna ah cudurka halista ah ee umaduhu la idlaadaan. Asbaabta uu u noqday cudur halis ah waynu faah-faahin doonaa haddii Rabbi idmo.

Qormadaan qeybaheeda kale waxaan xooga saari doonaa noocaan dambe ee xagjirnada ah ee loo yaqaan "**Tashadud**", "**Tadaruf**" iwm. Waxaan si gaar ah uga ka hadli doonaa haddii Rabbi idmo asbaabta keenta xagjirnimada noocaan ah iyo astaamaha lagu garto qofka qaba cudurkaan xagjirnimada dilaaga ah.

Xagjirnimadaani kuma eka diin keliya ee waxay kale oo gashaa dhaqanka, akhlaaqda iyo siyaasadda. Sidaa owgeed waxaan wax ka tilmaami doonaa (Rabbi idinkiis) isbar-bar dhigna ku samayn doonaa jawaanibta ay iska dhexgalaan xadgubuka siyaasiga ah iyo kan diimeed oo labaduba abuura bur-bur, deganaansho la'aan, dhiig badan oo daata, nabadgelyada oo laalanta iyo colaad aan dhamaan oo lagu le'do.

La soco …